



Macluumaadkii ugu Danbeeyay Casriyaynta Jefferson Sebtembar 2024

Qoysaska iyo Bulshada Jefferson ee Qaaliga ahow,

limaylkanu wuxuu qayb ka yahay warbixinihii ugu danbeeyay ee isdabajoogga ahaa ee idin kaga imaanayay kooxda Mashruuca Casriyaynta Jefferson si la idiin la socodsiiyo waxyaabaha ku saabsan mashruuca. Waxaad macluumaadkii hore ka akhrisan kartaa [halkaan](#). Ilaa iyo wixii ka danbeeyay [macluumaadkeeni](#) ugu danbeeyay ee Juun, Kooxda Mahruucu waxay qabatay laba simanaar oo bulshada lagu barayay naqshadda kuwaas oo qayb ka ah **qorshaha ka qaybgalka iyo xiriirka ah ee cusub kaasoo udub dhexaad u ah aragtida ardayda iyo sidoo kale wax ku biirinta bulshada iyo daneeyayaasha maxaliga ah.** [Halkaan riix si aad u hesho liiska siminaarada soo socda ee ku saabsan naqshadda bulshada Jefferson.](#)

Siminaarkii dhacay Luulyo 1keedii waxaa kujiray macuumaadkii ugu danbeeyay ee mashruuca, wada xaajood ku saabsanaa Isla meeldhigidda Dhaqanka, iyo fursadaha si wax loogu biiriyo waxyaabaha ku saabsan naqshadda dugsiga cusub.

[Fiiri Agabyada Bandhiga Siminaarkii dhacay Luulyo 17keedii](#)
[Arag Gunaanadka Siminaarkii dhacay Luulyo 17keedii](#)

Siminaarkii dhacay Ogoosto 14keedii waxaa diiradda lagu saaray baarista horumarka laga gaaray diyaarinta naqshadda iyo sida xubnaha bulshadu rabi lahaayeen inay u arkaan ilaalinta taariikhda jefferson guud ahaanba dhismaha. Waxay sidoo kale isla fiiriyeen qaababka ay ugu dabaaldagi karaan dhaqanka Jefferson ee banaanka dhismaha cusub ayada oo la isticmaalayo waxyaabaha naqshadaynta.

[Fiiri Agabyada Bandhiga Siminaarkii dhacay Ogoosto 14keedii](#)
[Fiiri Gunaanadka Kulankii Siminaarkii dhacay 14kii Ogoosto](#)

Ayada oo qayb ka ah dadaalka sare u qaadista aragtida ardayda, kooxda mashruuca iyo kuwo ku lamaan ayaa ardayda kula kulmay barnaamijka xagaaga ee SEI si ay u ogaadaan qaabka ay doonayaan inay u arkaan sida isirkooda iyo dhaqankooda loogu muujinayo dhismaha cusub.

Fursadaha Ka qaybgalka ee Soo socda

Siminaarka kan xiga ee Naqshadda Bulshada ee Jefferson wuxuu dhacayaa Arbacada, Sebtembar 25keeda, 5ta galabnimo wuxuuna ka dhacayaa Jeff Cafeteria. [Halkaan ka eeg Liiska Taariikhda Kulama soo Socda](#)

Siminaarka Nashadda Boolasha iyo Daadooyinka

Kooxda mashruucu waxay dhexda uga jiraan wajiga qaabka naqshadda ayaga oo fahamka lagu diyaariyay qorshaha dhammaystiran u badalaya naqshado loogu tala galay qaybaha kala duwan ee dhismaha iyo qaybaha barnaamijka. Kooxdu waxay sidoo kale baarayaan xaaladaha biyo ceshiga iyo ciid ceshiga ee hareeraha dhismaha si ay u diyaariyaan qorshaha naqshadda biyaha daadadka ah. Intaas waxaa dheer, waxay si toos ah oola shaqaynayaan shaqaalaha Magaalada Portland si loo diyaariyo nidaamka ogolaanshaha ee soo socda.

Lasoo dag Macluumaadka Mashruuca Jefferson

[Arag macluumaadkii ugu Danbeeyay ee ku saabsan Casriyaynta Jefferson ee Xagaaga 2024.](#)

[Español](#) | [Tiếng Việt](#) | [Русский](#) | [Soomaali](#) | [中文](#) Waxaa kujira gunaanadka mashruuca iyo macluumaadka kale ee ku saabsan shaqada.

Si joogto ah u bookho websaytka si aad u hesho macluumaad dheeraad ah

Websaytka mashruuca Casriyaynta Jefferson, <https://www.pps.net/JeffersonBond>, ayaa idin la socodsiin doona waxyaabihii ugu danbeeyay ee soo kordha, oo ay kujiraan fursadaha ka qaybgalka iyo bandhigyada kulamadii hore.

Waad ku mahadsantahay sida aad nooga caawinayso abuurista Jefferson High School-ka cusub.

Kooxda Mashruuca Jefferson